1 - 30 SETEMBAR 2020

# KA JAWAAB CELINTA COVID-19 URURKA BISHA CAS (SRCS)

Ururka Bisha Cas, oo iskaashi la leh Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas, ayaa caawinaya bulshooyinka iyadoo la xoojinayo dhiirigelinta caafimaadka, fayo-dhowrka iyo ololayaasha wacyigelinta si looga hortago faafitaanka COVID-19.

Goobaha bartilmaameedka u ah Ururka waxa ka mid ah Xarumahihiisa Daryeelka Caafimaadka Asaasiga, bulshooyinka ku nool meelaha xarumaha caafimaadka u jira fogaasho 5 km ah, isbitaalada, degaanada barakacayaasha iyo meelaha kale ee khatarta badan leh.

## DHIIRIGELINTA CAAFIMAADKA

- **31,500** qofood ayaa la gaarsiiyey waxbarasho caafimaad sida dhiirigelinta fara xalka, dhaqanka kala fogaanshaha bulshada ee **71** xarumo caafimaad ee Ururka Bisha Cas.
- **36,200** bulshooyin ku nool meelo 5 km u jira xarumaha caafimaad ayaa la siiyay waxbarasho caafimaad oo kor loogu qaadayo gacmo dhaqashada iyo kala fogaanshaha bulshada iyo **2,150** boostaro ah iyo qalab kale.
- Shaqaalaha iyo matadawiciinta Ururka ayaa la siiyey waxbarasho caafimaad si ay kulamo ugu qabtaan Xarumaha Caafimaadka, suuqyada iyo in ka badan **37,800** oo ah xarumo barakacayaal iyo kuwo bulsho.
- **459** mutadawac ayaa la wacyi geliyey si ay u fuliyaan fariinta ka hortaga COVID-19 oo guri-ka-guri ah.

## KA HORTAGGA CAABUQA IYO XAKAMEYNTA EE XARUMAHA CAAFIMAADKA

- **137** shaqaalaha iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ayaa la siiyey qalabka ilaalinta shaqsiyeed.
- **19,934** ayaa ka faa'iideystey buufinta **71** xarumaha caafimaadka ee Ururka Bisha Cas iyo **57** goobaha bulshadu ku kulanto iyo xurmaha barakacayaasha.
- **1,967** maryaha wejiga lagu xirto, **14** heerkul beege, **1,972** gacmo gashi ayaa la siiyey **71** Xarumaha caafimaadka, Xarumaha Dhaqancelinta Naafada iyo Goobaha Nafaqeynta.
- Heer kulka bukaanka soo booqda xarumaha caafimaadka ee Ururka ayaa la hubiyaa ka hor inta aysan ku soo biirin kuwa kale ee goobta sugitaanka jooga.
- **56** shaqaalaha Ururka ayaa loo tababaray ka hortagga iyo xakameynta caabuqa waxana loo xilsaaray in ay ku dabaqaan aqoontan iyo xirfadan qalabka xarumaha caafimaadka.

## DHIIRIGELINTA FAYO-DHOWRKA

- **41,432** ayaa la siiyay **591** haamaha gacmo-dhaqashada, **451** jeeri-gaan iyo **920** kartoon oo saabuun ah.
- Kulamo ku saabsan horumarinta fayo-dhowrka ee heer bulsho iyo mid xarun caafimaad ayaa la qabtey. Waxana farriimo ka hortagg iyo gacmo-dhaqashada saxda ah loo gudbiyey **6,120** shaqsi oo ah dadka degaanka iyo barakacayaasha. Sidoo kale, waxaa bandhig gacmo-dhaqasho lagu qabtey suuqyada, tuulooyinka iyo xarumaha caafimaadka.
- **41** taangi gacmo dhaqasho iyo saabuun ayaa loo qeybiyey **71** xarumo caafimaad ee Ururka.
- In kabadan **29,349** qofood ayaa inticmaaley adeegan.

## KOR U QAADIDA WACYIGA BULSHADA DHEXDEEDA IYADOO LA ADEEGSANAYO HANAANKA MACLUUMAADKA, WAXBARASHADA IYO WARBAAHINTA, TELEFISHINADA IYO RAADIYAHA

- Fariimaha muhiimka ah oo ku saabsan gacmo-dhaqashada, nadaafadda iyo kala fogaanshaha bulshada ayaa laga sii daayay idaacadaha iyo Telefishinada oo ka shaqeeya dhamaan gobollada dalka
- In kabadan **603,015** qofood ayaa ka faa'iideystay farriimaha COVID-19.

## DHISIDDA AWOODDA WAXQABAD

- **39** mutadawiciinta Bisha Cas, shaqaalaha xarumaha caafimaadka iyo guddiyada caafimaadka bulshada ayaa lagu tababarey COVID-19 iyo tallaabooyinka looga hortago, waxayna hadda ka qeyb qaataan howlaha kor u qaadida wacyiga.






